



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASARAADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAH
AGAASINKA ISTAATISTIKADA QARANKA**



Warbixin Bileedka
TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA
Diseembar 2019

Warbixin kooban

Dhammaan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Bisha Diseembar 2019 ayaa noqday 114.64, marka la barbar dhigo 116.10 ee Bishii Nofeembar 2019.

Isbedelka labada bilood u dhexeeya, Diseembar iyo Nofeembar 2019 ayaa hoos u dhacu gaaray -1.27 boqolkiiba marka la barbar dhigo hoos u dhaca billaha ah oo gaaray -0.12 boqolkiiba ee Bishii hore Nofeembar 2019. Majirin wax sare u kac bille ah oo muuqday inta lagu guda jiray Bisha Diseembar 2019.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay ee Bisha Diseembar 2019 ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB hoos u dhacay 3.13 boqolkiiba ee heerka cabirka sicir bararka, Marka la barbardhigo 12 bilood ee Bishii Nofeembar 2019 oo ahaa 3.81 boqolkiiba .

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Diseembar 2019	
Tusaha Bishan Diseembar	114.64
Tusaha Bishii hore Nofeembar	116.10
Tusaha sanadkii hore ee Bishii Diseembar	111.16
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba	-1.27 %
Isbedelka heerka sicir bararka ee sanadlaha ah boqolkiiba	3.13%


Shaxda 1: Sicir Bararka, Tusaha Sicirka Badeecadaha; Diseembar 2019 (Dec 2014 = 100)

Heerka Sicir Bararka Marka loo eego TSB

CPI Index

Percent change over twelve months

Index = 100 @ December 2014



Source: Directorate of National Statistics

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Diseembar 2019

Heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Diseembar 2019

Heerka sicir-bararka Bisha Diseembar 2019 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) **Diseembar 2019** ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, **Diseembar 2018** ilaa **Diseembar 2019**.

Dhammaan qeybaha **TSB** uu ka kooban yahay ayaa hoos u dhacay 3.13 boqolkiiba laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, Diseembar 2018 –Diseembar 2019, marka la barbardhigo isla laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar2018 –Nofeembar 2019, ayaa ahaa 3.8 boqolkiiba.

Dhamaman qeybaha TSB billaha ah ayaa hoos u dhacay-1.27 boqolkiiba Bishii Diseembar 2019, marka la barbardhigo Bishii hore ee Nofeembar 2019 uu hoos u dhacay-0.12 boqolkiiba .

War bixin bileedka Bisha Diseembar2019 ee ku saabsan TusahaSicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websitaka Agaasinka<http://www.dns.org.so>Twitter @DNS_MoPIED


Sicir bararka qeybo ka mid ah Badeecadaha, Diseembar 2019.

Sicir bararka qeybaha cuntada iyo cabitaanada caadiga ah *iyoo guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska* Cuntada lagu karsado ayaa ah kuwa ugu muhiimsan badeecadaha la isticmaalo oo dhan.

- **Cuntada iyo Cabitaanada caadiga ah** ayaa qiimahooda billaha ah hoos u dhacay -2.59 boqolkiiba, tan ayaa waxaa sababay qiima dhac ku yimid qeybo ka mid ah Cuntada Quutal daruuriga. Natiijo ahaan, sicirbararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 3.80 boqolkiiba Bishii Diseembar 2019, halka sicir bararka sanadlaha ah ee Nofeembar 2019 uu ahaa 6.61 boqolkiiba.
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** cuntada lagu karsado, ayaa ahaa 0.00 boqolkiiba intii lagu guda jiray Diseembar 2019, marka la barbardhigo hoos u dhac bille ah -0.07 boqolkiiba ee Bishii Nofeembar 2019, hoos u dhaca sanadlaha ah ee Bisha Diseembar 2019 ayaa gaaray -2.23 boqolkiiba, marka tan la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee ee Bishii Nofeembar 2019 oo ahaa -5.51 boqolkiiba.

Dhamaan Qaybaha TSB iyo kuwa la Xushay

Index = 100 @ December 2014




Source: Directorate of National Statistics

War bixin bileedka Bisha Diseembar 2019 ee ku saabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websitka Agaasinka <http://www.dns.org.so> Twitter @DNS_MoPIED

Qeybaha ugu waa weyn ee isbedelka Sanaddle ah (TSB)

B. Qeybaha ugu waaweyn ee isbedelka sanadlaha ah (TSB)

jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Diseembar 2019 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicir bararku Kordhay (+):


- **Cuntada iyo cabitaanada** caadiga ah ayaa sicirkoodu kordhay 3.80 boqolkiiba 12kii bilood ee Diseembar 2019. Sare u kaca ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha qudaarta (12.53 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qiimaha Liin Ugunjida (+42.86 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sare u kacay 10.84 boqolkiiba , marka la barbardhigo sare u kac sanaddle ah oo gaaray 11.38 boqolkiiba . Bishii Nofeembar 2019. Sicir bararka ayaa ka dhashay qiimaha dharka Caruurta oo gaaray (+15.45 boqolkiiba), marka loo eegayo sare u kac ku yimid dharka.
- **Qiimaha Adeega Gaadiidka** ayaa muujiyey hoos u dhac Sanadle ah oo gaaraya 4.73 boqolkiiba Bisha Diseembar 2019, marka loo barbardhigo 4.92 boqolkiiba ee Nofeembar 2019. inta badan sare u kaca ayaa ka yimid **kala iibsiga Gawaarida** oo gaaray (+11.28 boqolkiiba).
- **Tubaakada/khat** ayaa sare u kacday 14.28boqolkiiba Bishii Diseembar 2019, marka loo barbardhigo 12.99boqolkiiba ee Bishii Nofeembar 2019, marka loo eego qiimo kororka iyo isbedbedelka sicirka Qaadka. Taas ayaa ka dhigeysa in qiimaha qaadku yahay mid Sabeynaya.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay (-):

- **Madadaaladda, Hawo bedelehshada & dhaqanka** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaray -3.95 boqolkiiba Bishii Diseembar 2019, marka la barbardhigo hoos u dhac Sanadle ah -3.44 boqolkiiba Bishii Nofeembar 2019. Hoos u dhacan waxaa sababay qiimaha *Agabka soo dhaweynta, waxa lagu duubo iyo dib u soo saarista codadka iyo sawirada* oo gaaray (-4.24 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** cuntada lagu karsado, ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah oo gaarayey-2.23 boqolkiiba ee Diseembar 2019. marka la barbar dhigo Sicir barar sanadle ah ee qaybtaan uu hoos u dhacay -5.51boqolkiiba Bishii Nofeembar 2019, Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha qaybinta biyaha, iyo adeegyada yaryar oo gaaray (-5.98 boqolkiiba).

B. Heerka sicirbararka marka loo eego tusha sicirka badeecadaha

- **Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicir bararka ee bilaha dhamaan qeybaha;Diseembar**
- **2019 (Dec 2014 =100)**



Qeybaha ugu weyn ee Sicir bararku ku kordhay Bisha Nofeembar(+)

- Guud ahaan, dhamaan qeybaha ma jiraan isbedel muuqda oo la taaban karo Bishaan Diseembar, 2019.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay Bisha Diseembar 2019(-):

- **Cuntadda iyo cabitaanadda**, qiimaha cuntadda ayaa la diiwaan geliyey hoos u dhac dhan -2.59 boqolkiiba intii lagu guda jiray Bishii Diseembar 2019 halka-0.12boqolkiiba uu ahaa Bishii Nofeembar 2019, hoos u dhaca ugu weyn ayaa ka dhashay qiimaha cuntada(-2.67 boqolkiiba).

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Diseembar 2019 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Diseembar 2018 Tusaha	Nofeembar 2019 Tusaha	Diseembar 2019 Tusaha	Boqolkiiba Isbedelka Bishaan iyo Bishii hore	Boqolkiiba Isbedelka Bisha sanadkaan Iyo Bisha sanadkii hore
<i>Dhamaan qeybaha TSB</i>	100.00	111.16	116.10	114.64	-1.27	3.13
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	116.89	124.55	121.33	-2.59	3.80
Tubaakadda	1.25	124.39	142.16	142.16	0.00	14.28
Dharka & Kabaha	5.03	108.88	120.68	120.68	0.00	10.84
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	105.62	103.26	103.26	0.00	-2.23
Agabka Guryaha	2.93	104.29	102.71	102.73	0.02	-1.49
Caafimaadka	5.00	102.77	118.92	119.13	0.18	15.92
Gaadiidka	3.77	105.57	110.57	110.57	0.00	4.73
Isgaarsiinta	2.80	94.37	96.32	96.32	0.00	2.07
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	102.5	98.45	98.45	0.00	-3.95
Tacliinta	4.00	100.45	107.75	107.75	0.00	7.27
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	137.63	135.9	135.90	0.00	-1.26
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	107.44	105.03	105.11	0.08	-2.16

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahanku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaa qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soo saarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Janaayo 2020 waxaa la baahin doonaa 15th Febarayo 2020. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.dns.org.so>

War bixin bileedka Bisha Diseembar 2019 ee ku saabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websiteka Agaasinka <http://www.dns.org.so> Twitter @DNS_MoPIED

Lifaaqa 1aad: *Dhammaan Qeybaha 'TBS' –kuwa ka qeybqaatay sicir-bararka Bishii Diseembar 2019.*

Dhamaan Qaybaha TSB

Points contribution (%) to inflation rate (contribution by COICOP)



Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn ku saabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbar dhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kala saameyn badan yihiin (kaqeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSBka.

War bixin bileedka Bisha Diseembar2019 ee ku saabsan TusahaSicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websiteka Agaasinka <http://www.dns.org.so> Twitter @DNS_MoPIED